



Habeenka Macluumaadka Fasalada 8^{aad} Wuxuu Ardayda iyo Qoysaska Ka Caawin Doonaa Inay Wax Badan Ka Ogaadaan Mustaqbalka Dugsigooda Sarre

Ardayda Dugsiyada Dadweynaha Portland ee ku jira sanadkii ugu dambeeyey ee dugsiyada dhexe iyo qoysaskooduba waxay wax ka badan ka ogaan doonaan habeenka macluumaadka fasalada 8^{aad} ee sanadlaha loo qabto kulankaasi oo bilaabmaya dhamaadka bishani

Kulanada waxaa lagu qaban doonaa qaabka muuq-baahiyaha(virtual) sanadkan, sababtoo ah si looga taxadiro xanuunka faafaya ee COVID-19. Dariska, dugsiyada leh manhajka gaarka iyo dugsiyada sarre ee badiilka ah waxay ardayda iyo qoysaska siin doonaa fursad ay kaga dhageystaan macallimiinta iyo shaqaalaha iyo waliba inay wax ka ogaadaan dhismaha dugsiya, waxbarashada iyo barnaamijyada kale ee ay bixiyaan.

Macluumaad badan oo ku saabsan kulanada, sidoo kalena xog kale oo ku saabsan dugsiyadayada sarre, waxaad ka heli karaan marka aad booqataan halkan pps.net/8thgradeinfo. Boggan waxaa la cusbooneysiin doonaa taariikhaha, waqtiyada iyo macluumaadka sida looga qeybgalo kulanada marka ay soo dhammeystiraan.

Dugsiyada Dadweynaha Portland (PPS) ardaydu waxay wax ka bartaan dugsiyada dariskooda ku yaala, ama waxa ay codsadaan inay wax ka bartaan Dugsiga Sarre ee Farsamada Gacanta Benson, Dugsiga Sarre- Kulliyada Dhexe ee Jeffereson kaasi lehna waxbarasho la horumariyey ama Metropolitan Learning Center. Qoysaska raba in ardaydoodu wax ka bartaan saddexdaasi dugsi waxay u baahan doonaan inay soo codsadaan inay ka qeybgalaan bakhtiyaanasiibka. Sanadkani fursada bakhtiyaanasiibka waxa la qaban doonaa inta u dhaxaysa bisha Noofembar 29keeda ilaa Diisembar 17keeda.

Xogta ku saabsan bakhtiyaanasiibka sanad-dugsiyeedka 2022-23 waxaa loo soo diri doonaa dhawaan qoysaska u qalma inay helaan. Fadlan waxaad la xiriirtaan la-taliyaha dugsiyiinta ama Xarunta Bedelka iyo Isdiiwaangalinta PPS ee telefoonkeedu yahay 503-916-3205 ama haddii aad hayso wax su'aalo waxaad email u dirtaan halkan enrollment-office@pps.net.